

# U xoogsheegad

Joojisteeda Dhamaanteena  
Gacan Baan Ka Gaysan Karnaa



Tilmaamo loogu talogaley Waalidiinta  
ay Ardaydoodu dhigato Dugsiga Sare iyo Hoose

Gu'a 2013

Saameynta U xoogsheegashada waxay gaartaa bar iskuulka ka fog. Adiga waalid ahaan\*, waa kan waxa aad ka feejignaananayso, waxa aad sameyn karto, iyo halka aad kaalmo u doonan karto.

\*Tilmaantan dhexdeeda, "waalid" waxaa laga wadaa waalidiinta iyo mas'uuliyiinta.

---

## Waa maxay foorjo ama xoog isu sheegasho?

U xoogsheegashada waa dhaqan gardarro kaasoo badanaaba ah mid mar kastaba soo noqnoqda. Waxaa loola jeedaa inuu dhaliyo waxyeello, cabsi ama rafaad ama abuur bay'ad aan la jeclaysanayn ee iskuulka qof kale loo geysto. U xoogsheegashada waxay ku timaadaa marka ay jirto xaalad ah marka ay jirto awood dhab ah ama loo qaato inay jirto awood aannan sinnayn.

Fasirraadeeda oo buuxda waxaad ka heli kartaan Xeerka Waxbarshada,  
<http://www.e-laws.gov.on.ca>



# Noocyada U xoogsheegashada?

Ma xoog isu sheegashaba haddii ubadkeyga aan jir ahaan la dhaawac loo geysan?

U xoogsheegashada wajiyo badan ayay leedahay. Waxay noqon kartaa:

- **jir dil** – jug, kala tuurid, waxyeello hanti loo geysto ama la xado
- **hadal ahaan** – af lagaado, jees-jeesid, ama hadal xaqiraad jinsi, midab takoor, ama cabsi cuqdadeed oo khaniis loo wado
- **bulsho** – kuwa kale laga saaro koox ama xan la faafiyo ama hadalo ku-tiri-ku-teen iyaga laga sameeyo
- **qoraal** – laga qoro hadalo ama calaamaddo waxyeeleeya ama af-lagaado ku ah
- **elektaroonig** (guud ahaan loo yaqaan foorjo la isu gudbiyo) – la faafiyo hadalo ku-tiri-ku-teen ah iyo hadalo qofka waxyeeleeya oo loogu gudbiyo iyada oo la isticmaalayo email ahaan, telfoonka gacanta (tusaale ahaan, fariinka la isu diro), iyo bugga bulshada la isu mariyo.

## Waa maxay u xoogsheegashada eleegtaronig ama foorjo la isu gudbiyo?

Waa wada-hadal la isugudbiyo oo elegtaroonig ah kaasoo:

- loo isticmaalo in qof kale looga xanaajiyo, lagu cabsigeliyo ama lagu dhibo.
- loo isticmaalo qaab email, telfoonka gacanta, fariin qoraalleed ama iyo bogga iyo kan bulshada si qof kale loogu hanjabo, dhibo(af-lagaadeeyo), bulshada looga bixiyo ama magaciisa iyo saaxiibtinimadiisa waxyeello loo geysto.
- oo ay ku jiraan qof hoos lagu dhigayo, caytan, iyo sidoo kale in ku-tiri-ku-teen la faafiyo, wadaagida macluumaad gaar loo leeyahay, sawirro ama fiidiyow ama hanjibaad qof lagu wax-yeelayo.
- waa mid markastaaba dhib badan oo qofka waxyeello u geysata.

Iskuullada Ontario, maamullada waxaa looga baahan yahay in ay wax ka qabtaan foorjada la isu gudbiyo qatka haddii ay saameyn ku yeelaneyso jawiga iskuulka. Tusaale ahaan, haddii ardayga xoog loo sheegto oo ay dhaliso inuu ka yax-yaxo fariinta email loogu soo direy awgeed oo isaga ama iyada ku saabsan oo ardayda kale iskuulka dhigata ku socota, isaga ama iyada waxaa dhici karta in aysan dooneyn in iskuulka ay soo xaadiraan.

Noockasta oo ahaato, foorjeeyaan ama boocboosiga marnaba ma ahan wax la oggolaan karo.

U xoogsheegashada waxay dhacdaa goorta uu jiro awood aannan loo sinnayn oo dadka ka dhaxeysa. Aanan loo “sinnayn” waxay noqon kartaa hal arday ayaa weyn, jinsi ka duwan ah ama leh saaxiib ka badan ardayga kale.

## Ma isla mid baa is-af-garadwaaga iyo u xoogsheegashada?

Mar marka qaarkood dadka ayaa waxay ku jahwareeraan is-af-garadwaaga iyo u xoogsheegashada, laakiin way kala duwan yihiin.

Is-af-garadwaaga wuxuu ka dhexdhacaa laba qof ama in ka badan oo dhexdooda qilaaf ama ismaandhaaf yaala, oo ay ku kala duwan yihiin fikir ama aaraa. Is-af-garadwaaga oo arday dhexyaala micnaheedu markastaaba ma ahan in boocboocsi yahay. Carruurta iyagoo da’ yar ah ayay fahmaan in kuwa kale ay yeelan karaa go’aan ama fikir ka duwan koodii, laakiin in ay kobciyaan kartidii ay yeelan la’haayeen go’aan waqti ayayay qaadataa oo hannaankaas wuxuu sii socdaa ilaa iyo ay ka gaaraan qaan-gaarnimo (Stepping Stones: Isha Hormarinta Dhalinyarta, bogga 26).

Is-af-garadwaaga dhaca, qof kasta nafis ayuu dareemaa marka uu isaga ama iyada fikirkeeda soo bandhigeysa, oo ma jiraan sinnaan la’aan awood. Qof kasta wuxuu dareemaa inuu dhihi kara aragtidiisa/eeda. Sida qofka ula macaamilo is-af-garadwaaga ayaa ka dhigi karta mid wanaagsan ama mid xun.

Is-af-garadwaaga wuxuu noqdaa mid aan wanaagsanayn goorta shaqsigu u dhaqmo si gardarro ah isyaga oo yiraahda ama sameeya waxyaabo waxyeello geysan kara. Ka dibna is-af-garadwaaga wuxuu noqday dhegal gardarro ah. Is-af-garadwaaga wuxuu xoog isu sheegasho noqdaa kaliya goorta la soo celceliyo oo sheegsheego oo waxaa jira awood aannan loo sinnayn. Waqti ka dib, dhaqan caadi ah ayaa ka soo bixi kara marka qofka gardarrada u dhaqma marka is-af-garadwaaga yimaado inuu qofkaasi sii wada ama xitaa ay ka sii dartaba. Shaqsigu ah kan la gardarreysto marka is-af-garadwaaga dhacey waxaa dhici karta inuu dareemo tabar darro ama yara awoodi waayo inuu aragtidiisa/eeda soo bandhiggo oo wuxuu dareemayaa oo aad u dareemayaa awood la’aan. Taasi ayaa ah goorta is-af-garadwaaga xun dhici karto inuu isu badello boocboocsi.

Iskuulku jawaab kala duwan ayaa ka bixinayaa boocboosiga iyo is-af-garadwaaga. Tusaale ahaan, marka ay dhacdo arrin is-af-garadwaaga ah, xubnaha shaqaalaha iskuulka waxaa laga yaabaa inay isku dayaan in ardaydu isku yimaadaan oo ay sheeggaan waxa ay iyagu ay la tahay sheekada oo ay ka caawiyaan in ay wada-jir u xaliyaan.

Marka ay xoog isu sheegasho timaadana, maamulaha ayaa u tixgelin doona in ay anshax aan la qaadan karin, kaasoo keeni kara in ardayga la xannibo ama laga saaro.

## Sidee ayay halis u tahay dhibaataada u xoogsheegashada?

U xoogsheegashada marnaba ma ahan mid la oggolaan karo. Ma ahan in marna la iska yiraahdo in ay “korniinka qeyb” ka tahay. Cilmi baarista iyo qibradda waxay si joogto ah u muujiyaan in u xoogsheegashada ay tahay arrin halis ah, cawaaqibbaddeedana ay meel fog geyn karto ardayda lugta ku leh, qoysaskooda iyo asaagiisa ama faciisa, iyo bulshada uu ku heeraarsan yahay.

Carruurta kuwa la dhibaateeyeyna, carruurta kale ayay xoog u sheegtaan, ama labadaba, waxay halis ugu jiraan dhibaatooyin badan ee dhan shucuurta, edebta, iyo xiriirka oo waxay taageero uga baahan yihiin dadka wa weyn in ay ka caawiyaan kobac xiriirro ladnaan qaba oo ma ahan dhanka iskuulka oo kaliya balse noloshooda inteeda kale.

Gobalkan Ontario ku dhowaad seddexdii arday mid (boqolkiiba 29) ayaa waxay soo sheegaan in iskuulka lagu foorjeeyo, sida laga soo xigtey daraasadda 2011 oo ay sameeyeen Rugta Caadaysiga iyo Caafimaadka Maskaxadda (Centre for Addiction iyo Mental Health (CAMH)).

Ardayda la foorjeeyey ama xoogga loo sheegtey waxay badanaaba la kulmaan walaac bulsho, kelinnimo, kala-noqosho, xanuun jir iyo kalsooni hooseysa. Sidoo kale waxay la soo bixi karaan dareen naceyb, aqlaaq xumo ay ku dhaqaaqaan, ama caabuqa ama muro ay ugu simbirixaan. Ardayda qaarkood iskuulka ayay seegaan, waxay arkaan in buundooyinkooda ay hoos u dhacaan, ama xitaa iskuulka ayay sideedaba iska dhaafaan maxaa yeeley xoog ayaa loo sheegtey.

Carruurta iyo dhalin-yarta bartay in ay isticmaalaan awood iyo xoog si ay u rafaadiyaan kuwa kale waxay bilaabaan in ay joojiyaan in ay dhigta u dhigaan guud ahaan faraqa u dhaxeeya waxa sax ah iyo wax qaladka ah. Kama-danbaystii, waxaa dhici karta in ay noqdaan dad wa weyn oo dibindaabyo badan geysta. Sidaas darted, waxaa muhiim ah in aad sida ugu soo sokeeyso ee suurtogalka ah iyaga gacan ka siiso joojinta foorjeynta ama u xoogsheegashada

## Ma si islamid ah ayay wiilasha iyo gabdhaha wax u foorjeeyaan?

Wiilasha iyo gabdhahaba wax way foorjeeyaan ama boocboocsaadaan. Wiilasha ayaa aad ugu badan in ay xoog dad u sheegtaan, halka gabdhaha ay guud ahaan ay isticmaalaan qaab si toos ah, sida in ay xantaan ardayda fasalka la dhigata ama in ay ka saaraan howlaha ay qaban la'haayeen ama kooxaaha. Da'da, Si kastaba ha noqotee, wiilasha iyo gabdhaha waxay u badan tahay in ay noqdaan kuwa af ahaan xoog sheegta iyo qaab bulsho ahaan.

## Sidee ku kala sheegi karaa haddii ubadkeyga ama dhalin-yartayda xoog loo soo sheegto?

Ubad yar waxaa laga yaabaa inuusan garanayn kalmada "foorjo," lakiin way ogtahay goorta qof dabci xun ama gardarro wata, waxyeello u geysanaya, ama dareensiinaya murug ama cabsi. Waxaa dhici karta in aysan kuu sheegin maxaa yeeley waxaa dhici karta in ay ka welwelsho in arrinka si xumeysa haddii ay "sheegto," "xan" ama "dhib."

Xanta iyo Sheegista	
Xanta	Sheegista
Xanta waa qof marka qof wax laga sheegayo si qofkaas dhibaato uga timaado.	Sheegista waa marka caawinaad loo raadinayo adiga ama qof aad ogtahay inuu dhaawacmay, ama xuquuqdaada ama xuquuqdooda oo aad ammaan ku noqon la'hayd, la qaado ama la idin diido.

(Ururka Isutagga Macalimiinta (Ontario Teachers' Federation (OTF) and Le Centre Ontarien de prévention des agressions (COPA), Abuurista Iskuullo Ammaan ah (Creating Safe Schools), Janaayo 2012, bogga. 56)

Ubadkaaga tobanleyda ah waxaa dhici karta in uusan/in aysan kuu sheegin dhibaato in ay jirto oo isticmaalo kalmad sida "kadeedis" halkan uu ka dhihi la'haa ama ay ka dhihi la'hayd "u xoogsheegashada" si ay ugu qeexaan caadada. Tobanleyda waxay badanaaba doorbidaan in ay arrimahooda ay iskooda u xijisadaan. Waxaa dhici karta in ay u fekiraan in aad ka xanaaqeyso, in aad ka qaadeyso qalabkooda teknoolijiyada, sida telfoonkooda gacanta, ama waxaa dhici karta in ay ka yax yaxaan in arrimahooda uu waalidka soo faragashado.

Haddii iyada aysan ka hadlin xitaa, waxaad arki kartaa calaamaddo ah in ubudkaaga xoog loo soo sheegto ama la sooboocboocsado. Waa kan qaar ka mid calamaddaha la iska ilaaliyo:

- Carruurta la boocboocsaday waxaa dhici karta in aysan doonayn in ay iskulka tagaan ama waxaa dhici karta in ay ooyaan ama maalmaha iskuulka xanuun dareemaan.
- Waxaa dhici karta in aysan dooneyn in ay qeyb ka qaataan howlaha ama ciyaaraha bulshada oo ay arday kale la sameeyaan.
- Waxaa dhici karta in ay u dhaqmaan si ka duwan ee aan caadiga ahayn.
- Waxaa dhici karta in durbadiiba ay lacag ka maqan tahay ama waxyaabo ay iyaga iska leeyhiin maqan yihiin, ama guriga ay la yimaadaan dharkoodii jeexan ama wixii ay la'haayeen jaban yihiin, oo cudur daarka aysheegtaana noqdo mid aan micno ku fadhin.
- Dhalin-yarta la boocboocsaday iyo/ama kadeedis ayaa sidoo kale bilaabaya in ay yiraahdaan in ay iskuulka iska dhaafayaan oo waxay bilaabaya in ay u gembaliyaan ciyaaraha ardayda kale ay isla qaban la'haayeen.

## Ubadkeyga xoog baa loo sheegtey. Maxay tahay inaan sameeyo?

- Ubadkaaga dhegeyso oo u xaqiiji in isaga xaq uu uleeyahay inuu bad qabo.
- Xaqiiqooyinka aad u sheegeyso ha noqdeen kuwa cad. Qor waxa la sheegey oo dhacay iyo goorta ay dhaceen.
- Ubadkaaga ka gargaar inuu fahmo faraqa u dhaxeeyo "sheegista," "xanta" ama "sheegsheegga" iyo ka warbixinta. geesinimo ayay qaadaadaa in la soo sheego. Soo sheegista waxaa loo sameeyaa ma ahan in dhibaato loo keeno ardayga kale, balse laga ilaaliyo ardayda oo dhan.
- Ballan u sameeyso oo la soo hadal ubadkaaga/toban la'haaga macalinkiiisa/eeda, macalin kale oo uu ubadkaaga/toban la'haaga uu aamino ama maamulaha ama maamule ku xugeenka iskuulka.
- Dhibba ha iska noqotee, isku day in dagaan ku sugnaato si markaa ubadkaaga aad u caawiso oo aad u qorsheyso tallaabadii aad isaga ama iyadu aad la'qaadi la'hayd.
- Tabaha ku taagnow. Ubadkaaga asluubtiiisa/eeda idhaha ku haay. Haddii kulankii shaqaalaha iskuulka aysan noqon mid joojisa u xoogsheegashada, dib ugu laabo oo maamulaha la hadal. Dabagal ku sameeyo tallaabada la isku raacey inta kulanka lagu jirey.
- La hadal macalinka ama tababaraha haddii foorjada ay socoto ciyaaraha iskuulka ka dib la qabto ama kulamada ciyaaraha.
- Baliiska la xiriir haddii u xoogsheegashada ay la socoto akhlaaq dambi, sida gacan ka hadal galmada la xiriira ama hub la isticmaalo, ama haddii halista ammaanka ubadkaaga ay xaafadda soo gaartey halka iskuulka kaliya uu ka ahaa.

Shucuur la-qeybsiga waa awoodda garowsiga iyo wadaaggida niyad-kaca ee qofka kale dareemayo. Goor dambe ee qaangaarnimada ayay timaadaa oo badanaa waxay si buuxdo ah u timaadaa horraanta qaan-gaarnimo. Carruurtana, nooc aassaasi ah oo shucuur la-qeybsiga waxay u timaadaa goorta ay carruurta ay bilaabaan marka ay carro dareemaan goorta ay arkaan dadka kale oo carreysan.

(Stepping Stones: Isha Hormarinta Dhalinyarta, bogga 25).

## Sidee baan ubadkeyga uga caawin karaa in foorjada iyo u xoogsheegashada ula tacaalo?

Adiga oo la shaqeeya iskuulka si ubadkaaga ama dhalin-yartaada uga caawiso in ay iska xajiyaan dhibaataada boocboosiga, adiga ayaa tusaale u noqonaya oo siinaya fariin cad oo ah in u xoogsheegashada ay tahay arrin qalad ah.

Ayadoon da'da loo eegeyn, waxaad ku caawin kartaa adiga oo ubadkaaga ku dhiirigeliya in uu kaala hadlo waxyaabaha ku saabsan u xoogsheegashada iyo adiga oo siinaya talada soo socota:

- Isdeji oo xaaladda **ka darer**.
- **Usheeg qof weyn** oo aad aaminayso – macalin, maamule, darawalka baska ama horjoogaha barta qadada - waxa dhacay ama si adiga oo aanan lagu shaacin sheeg.
- **Uga hadal** walaalahaaga, gabdhaha walaalahaaga, ama saaxiibadahaaga, si markaa aaddan u dareemin in aad kaliya tahay.
- **Qatka Caawinaada Carruurta (Kids Help Phone)** ka wac 1-800-668-6868 ama booqo bogga [www.kidshelpphone.ca](http://www.kidshelpphone.ca)

## Ma suurto gal baa in ubadkeyga kuwa kale uu boocboocsado ama foorjeeyo?

Carruurta wax foorjeeya ayaa mar marka qaarkood ka sameeya guriga iyo sidoo kale iskuulkan ku sameeyo. Gurigaaga dhexdiisa eeg oo dhegeyso waxa ka socda. Ma jiraa calaamaddo ah in mid ka mid ah carruurtaada uu xoog isu sheegashto walaalhiisa/eeda?

Carruurta wax foorjeeya ayaa dhacda in mar marka qaarkooda noqda in guriga dhexdiisa gardarro uga dhaqmaan ama aysan wax texgelin ah siin sharciga aqalka guriga u yaal. Haddii aad ka wel welsan tahay in ubadkaaga dhici karto inuu kuwa kale xoog isu sheegashto, fiiri sida uu udhexgalo walaalhiisa, adiga, iyo asxaabtiisa ula dhaqmo goorta ay gurigaaga yimaadaan. Haddii ay umuuqdaan in ay gardarro ku dhaqmayaan, aysan kuwa kale heshiinayn ama naxariis u muujinayn – sidoo kale kuwan ayaa noqon kara calaamaddo ah in kuwa iskuulka joogana ay xooga u sheegaan.

Carruurta kuwa kale xoog sheegta oo kuwa kale waxa ugeysta ayaa sidoo kale guriga la yimaada iyaga oo la soo gaarsiiyay waxyeello, xoqid, iyo dharka ka jeexan. Waxaa dhici karta in durbadiiba heystaan lacag badan oo ay ku qarshagareeyaan sida caadiga ka duwan ama soo iibsadaan walxo cusub ooaysan awoodi karin waqtiga caadiga ah. Sidoo kale waxaa dhici karta in ay si "qatar ah ula hadlaan" ardayda kale.

Akhlaaqda u xoogsheegashada waxay socon kartaa mudo dheer ah ama waxay keeni kartaa isbadello weyn, qaasaaro ama ay ka carreysiin kartaa ubadka ama tabanaha noloshiisa. Ma ku aragtey dhowaan carruurtaada qibrad noocan oo kale ah?

Ka fikir sida dhibaatooyinka ama is-af-garadwaaga gurigiina loogala tacaalo. Miyaad arrinka qoys ahaan si wanaagsan ah uga hadashaan? Qaab muhiim ah oo aan dhiirigelineyn boocboocsiga ayaa ah in tusaale wanaagsan la noqdo oo ubadkaaga aad tusto sida dhibaatooyinka loo kala saaro iyada oo aannan la isticmaalayn wax awood ah ama gardarro ah.

Sidoo kale waxaa muhiim ah in carruurtaada aad u sheegto u xoogsheegashada/boocboocsiga/foorjada waxay ay tahay. Waa in aad u qeexdaa noocyada kala duwan ee u xoogsheegashada oo u sharax in ay dhaawac iyo waxyeello ay leedahay. Ubadkaaga oggeysii in boocboocsiga ama u xoogsheegashada ay qalad tahay oo ay tahay caado aan marna la oggolaan karin xaalad kasta ha noqotee.

## Sidee ayay iskuullada ula tacaalaan u xoogsheegashada iyo dhacdooyinka kale?

Ardayda xoogga usheegata ardayda kale, ha noqoto mid ku timaada shaqsi ahaan ama mid qadka internetka lasoo mariyo, wuxuu wajahi karaa cawaaqibbo kale duwan.

Goorta u xoogsheegashada la wajahayo, maamuladda waxay isticmaalaan hab anshaxa lagu hormarinayo. Sharciga horumarinta anshaxa ee Ontario wuxuu maamuladda u oggolaadaa in ay dalabyo dhowr ah ka doortaan sida ay u wajahi la'haayeen asluubta oo ay u caawin la'haayeen ardayda in ay dalabka uu sameeyey/sey wax ay ka barato. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah:

- raali gelin ku aaddan hadalkii texgelinta la'haa ama waxyeellada la'haa
- dib loo eeggo waxyaabaha ardayga laga filannayo
- waalidka kulan lala yeesho
- la talinta maareynta xanaaqa
- in ardayda iskuulka laga xannibo.

Mararka ay jirto xaaladdo aad u darran, maamulaha ayaa dhici karta inuu ku taliyo in ardayda iskuulka laga ceyriyo haddii ardayga horey arrin xoog u sheegasho awgeed iskuulka looga xannibey oo ilaa iyo iminka sii watey anshaxa aan la oggolaan karin ee halis ku ahayd ammaanka qofka kale. Xeerararkan wuxuu qabtaa ardayda dugsiyada hoose iyo kan sare.

Hormarinta anshaxa waxay ka caawisaa in ay ka hortagto anshaxda aan habooneyn in ay ka sii darto oo ay raad la jecleysanayn ku yeelato ardayda oo dhan iyo sida ay u arkayaan ammaanka iyo iskuulka. Sidoo kale waxay gacan ka geystaa asluubta ardayga oo waxay ardayga ka caawisaa inuu mas'uuliyaddeeda qaada falalkiisa/eeda oo uu barta qaabab iijaabo leh oo ardayda kale la isu dhexgalo.

Iskuullada waxay ardayda lugta ku leh u xoogsheegashada oo dahan u fidiyaan: ardayda xoogga loo sheegtey, ardayda lugta lu leh caadada xoog u sheegashada, iyo kuwa goob joogga u ah caadadan.

Iskuullada iyo guddiga oo dhan waxay looga baahan yahay in:

- ay yeeshaan sharciyo looga hortago oona lagu wajaho u xoogsheegashada
- qorshooyin looga hortagayo oo loo dhexgalyo u xoogsheegashada
- sharciyo loo hormarinayo anshaxa iyo mid ahanashaha iyo sinnaanta tacliinta.





Dhamaan shaqaalaha guddiga waxaa looga baahan yahay in ay soo sheegaan dhacdooyinka daran ee dhacey, sida u xoogsheegashada, ay maamulaha ku soo wargeliyaan. Maamullada waxaa looga baahan yahay in ay baaritaan ku sameeyaan dhamaan dhacdooyinka u xoogsheegashada ee la soo sheegey.

Shaqaalaha iskuulka ee sida tooska ah la shaqeeya ardayda, sida macalimiinta, shaqaalaha bulshada iyo la talinta ardayda, waa in ay soo sheegaan dhamaan caadooyinka aanan bahooneyn ama ixtiraam-xumada ee saameyn xumada ku yeelan karta jawiga iskuulka, oo ay ku jirto u xoogsheegashada.

Guddiga iskuulka waxaa looga baahan yahay in ay ardaydu u fidiyaan barnaamijyo, ka hortaggid ama taageero kale ee loogu talogaley ardayda xoogga loo sheegtey, ardayda goobjoogga u ahaa u xoogsheegashada iyo kuwa gacanta ka geystey u xoogsheegashada.

Macluumaad dheeraad ah ee sida shaqaalaha ay ula tacaalayaan dhacdooyinka ka dhaca iskuulka, qeybta “Ka Warbixinta iyo Jawaab-celinta” (“Reporting and Responding”) ee barta internetka ee [www.edu.gov.on.ca/eng/safeschools/reportingResponding.html](http://www.edu.gov.on.ca/eng/safeschools/reportingResponding.html) ama maamulaha iskuulkaaga la hadal haddii aad jeceshahay in aad wax badan ka oggaato adeegyada aad iskuulka ka heli kartid.

Maamullada waa in ay xiriir la sameeyaan waalidiinta ardayda xoogga loo sheegtey, iyo sidoo kale ardayda gacanta ka geystey u xoogsheegashada, oo iyaga u sheeg:

- wax dhacey
- waxyeellada loo geystey ardayga
- waxa ay yihiin tallaabada la qaadey ee lagu ilaalinayo ammaanka ardayga, oo ay ku jirto tallaabada aqlaaqda ee la qaadey si looga jawaab-celiyo dhacdada
- waxa ay tahay taageerada loo fidiyay ardayga si looga jawaab-celiyo dhacdada.

Intaa waxaa raaca:

- maamullada waa in ay casuumaan waalidiinta si ay uga xaajoodaan taageerada ubadkooga loo fidiyay.

## Haddii ubadkeyga loo xoog sheegtey, maxay tahay waxa aan iskuulka ka filan karo?

Iskuulka waa in uu leeyahay hannaan uu adiga, ardayda iyo dadka kale iyaga oo aanan la shaacin u soo sheegi karaan dhacdooyinka u xoogsheegashada.

Haddii ay jiraan wax wel wel ah oo ku saabsan ubadkaaga ama aad kaliya dooneyso in aad hesho macluumaad dheeraad ah, weydiiso in lagu tuso:

- Sharciga ka hortagga iyo dhexgalka u xoogsheegashada ee guddiga iskuulkaga.
- Xeerka aqlaaqda iskuulka, kaasoo tilmaama sida ardayda, macalimiinta, iyo xubnaha jaaliyadda iskuulka ee kale loog abaahan yahay in midba midka kale ula dhaqmo.

- Qoshaha ka hortagga iyo dhexgalka u xoogsheegashada ee guddiga iskuulka. Dokumentigan wuxuu tilmaamaya waxa ay tahay in shaqaalaha iskuulka ay sameyn si ay dhibaataadu u xaliyaan.
- Natiijooyinka iskuulka oo ka tim Rayi ururinta Jawiga Iskuulka. Rayi ururintan aan magacaaga lagu sheegeyn waxay iskuulka ka caawineysaa in ay qiimeyn ku sameeyaan ammaanka oo ay go'aanno ka gaaraan sida loogu hortaggo u xoogsheegashada oo ayna gacan ugu geystaan ammaanka iyo oggolaansha iskuullada. Rayi ururinta waa in la qaadaa ugu labadii sanadba mar.

Haddii shaqaale oggaado in ubadkaaga xoog loo sheegto, waxaad filan kartaa in iskuulka uu kula soo xiriir. Waxaa dhici karta in ubadkaaga macalinka ama macalin kale oo ubadkaaga aamino ay dhici karto inuu kaa caawiyo xeelado kaa caawini kara in dhibaataada la xaliyo.

Iskuullada waxaa laga filayaa in ay dadaal kasta u galaan in si buuxda ay baaritaan ugu sameeyaan welwelkaaga, iyagoo dhowraya ardayga waxa qarsoodiga u ah.

Iskuullada ardayda oo dhan ay caawin doonaan kuwa u xoogsheegashada wax ku lahaa, oo ay ku jiraan kuwa wax ka geystey u xoogsheegashada, kuwa loo xoog sheegtey iyo kuwa goobjooga ka ahaa u xoogsheegashada.

Iskuulka wuxuu la'haan doonaa hannaan aad raaci karto haddii aad ka wel welsan tahay taageerida ubadkaaga loo fidiyey. Haddii aaddan ku qanacsanayn jawaab-celinta iskuulka, waxaad ula xiriiri kartaa sarkaalka horjoogaha ee guddiga iskuulkaaga.

Taa waxaa raacsan, waxaad ka fekeri kartaa in aad ku buurto Kooxda Oggolaanshaha Iyo Ammaanka Iskuulka ee iskuulkaaga. Kooxda waxay mas'uul ka yihiin kobcinta iskuullo ammaan ah, loo wada siman yahay oo la is oggolaado. Waxaa ku jira maamulaha, ugu yaraan hal waalid, shaqaale iskuul, arday iyo iskaashiga jaaliyadda.

## Wahagaag, ubadkeyga koley u xoogsheegashada kaalin kuma laha ...

Qof kasta ayaa wax ka soo gaara goorta xoog isu sheegasho ay dhacdo, oo qof kasta ayaa kaalin ka qaadan kara inuu ka hortaggo. Boqolkiiba 85 kiisaska, u xoogsheegashada goobjoogaha ayay hortiisa ka dhacdaa. Goobjoogayaashan saameyn ayay ku yeelataa waxa ay arkayaan. Inkastoo goobjoogaha laga yaabo inuu ka baqo oo uusan dooneyn inuu lug ku yeesho maxaa yeeley waxay ka baqayaan in ay iyaga noqdaan kuwa lasoo doonto ama arrinka in ay uga sii daraan qofka xoogga loo sheegtey, u xoogsheegashada iyagoon magacyadooda aannan sheegin ayay soo sheegi karaan.

Haddii aad ubadkaaga aad ka caawin karto inuu fahmo in u xoogsheegashada ay tahay wax aan marnaba la oggolaanneyn oo uu gacan ka geysan karo joojinteeda isaga oo usoo sheegaya qof weyn ama soo gudbiya isaga oo aan magaciisa/eeda soo sheegin.



## Kobcinta xiriir ladan ayaa joojin kara u xoogsheegashada

Ka hortagga iyo dhexgalka u xoogsheegashada/foorjada/boocboocsiga kaliya ma ahan wax ka badan tirtirida u xoogsheegashada.

Sidoo kale waa gacan ka geystaa gacan ka geysiga xiriirro ladan. Xiriiro ladan wuxuu lug ku leeyahay dhexgallada texgelinta u dhaxeeya dadka, ha noqoto fool-ka-fool ama mid qadka internetka lasoo mariyo. Hadafka wuxuu yahay in laga caawiyo oo la hubiyo in dhamaan ardayda oo dhan haystaan xiriiro ladan, ammaan ah, texgelin iyo daryeel ku jirta oo ay la leeyihiin qofkastoo noloshooda la xiriira.

Macalimiinta, waalidiinta, iyo dadka wa weyn ee kale oo taageera oo u ah kuwo ay carruurta ku dayadaan iyaga oo tusaya sida loo yeesho xiriiro ladan oo shaqeyn kara. Xiriirada hubaalka ee carruurta ay la leeyihiin carruurta kale waxay ku xiran tahay xiriirada hubaalka ee ay dadka wa weyn la leeyihiin.

Ardayda leh xiriiro ladan ayaa ah kuwa ugu yar ee kuwa kale xoog u sheegta, waxay u badan tahay in ay taageeraan ardayda kale ee xoogga loo sheegtey, oo waxay u badan tahay in ay noqdaan kuwa gaara hadafkooda waxbarasho. Horrumarinta xiriiro ladan ayaa ah habka ugu muhiimsan ee looga hortaggi karo u xoogsheegashada oo loo abuuri karo jawi iskuul oo la is oggolaado isla markaana ah iskuul ammaan ah.

## Sida aan gacan uga geysanayno in Iskuullada Ontario aan ka dhigno kuwa ammaan ah oo la is-oggol yahay

Iskuul jawigiisu wanaagsan yahay oo ah bay'ad ammaan ah oo waxna lagu barto oo waxna lagu barro ayaa assaasi ah haddii la doonayo in ardayda ay iskuulka ku guuleystaan.

Baro wax badan oo ku saabsan:

- **Xeeladdaha Badbaadada Dugsiyada.** Xeeladdan dhamays tiran (is wata) waxaa ku qoran kooxda oggolaanshaha iyo ammaanka iskuulka ee iskuul kasta, ilaha iskuula, tababarka macalimiinta iyo maamullada, iyo la kaashanayo Qatka Caawinaada Carruurta. [www.ontario.ca/acceptingschools](http://www.ontario.ca/acceptingschools)
- **Rayi ururinta jawiga iskuulka oo waalidiinta loogu talogaley.** Rayi ururintan waxaa lagugu diyaariyay 22 luqaddood. [www.edu.gov.on.ca/eng/safeschools/climate.html](http://www.edu.gov.on.ca/eng/safeschools/climate.html)
- **Wajahida Ontario ee anshaxa.** "Horrmarinta anshaxa" iskuulka oo dhan ayay ka qeyb gelisaa oo waxay iskuulka u hormarisaa jawi iijaawo leh ama wanaagsan. Waxay maamulaha awood u siisaa inuu xusho cawaaqibbada ugu haboon ee uu ku wajahayo caadada ardayda ee aannan habooneyn. Waxay sidoo kale ardayda ay u fidisaa taageero dhowr ah oo ay ku gacan uga geysanayso caadooyin iijaabo leh ama wanaagsan. Sharcigan oo si faahfaahsan loo sharaxay waxaad ka heleysaa [www.edu.gov.on.ca/extra/eng/ppm/145.pdf](http://www.edu.gov.on.ca/extra/eng/ppm/145.pdf)
- **Xeerka Aqlaaqda.** Tilmaamahan Xeerka Aqlaaqda ee Ontario wuxuu sharrax-gaaban ka bixineyaa doorarka iyo mas'uuliyadda uu qof kasta oo ka mid ah jaaliyadda, ku waasoo oo ay ku jiraan ardayda, waalidiinta, shaqaalaha iskuulka iyo iskaashiga jaaliyadda. [www.edu.gov.on.ca/eng/safeschools/code.html](http://www.edu.gov.on.ca/eng/safeschools/code.html)
- **Sharciga Ontario ee Ka-hortagga iyo Dhexgalka U xoogsheegashada.** Sharcigan wuxuu sharrax-gaaban ka bixineyaa waxyaabaha laga filayo ee guddiyada iskuulka ee dejinta iyo hirgelinta sharciyadooda ah ka-hortagga iyo dhexgalka u xoogsheegashada. [www.edu.gov.on.ca/extra/eng/ppm/144.pdf](http://www.edu.gov.on.ca/extra/eng/ppm/144.pdf)
- **Xeeladda Mid Ahanashaha iyo Sinnaanta Tacliinta.** Tani waxay sharrax-gaaban ka bixineysaa sida wasaaradda, guddiyada iskuulka iyo iskuullada ay u taageeraan mid ahanashaha iyo sinnaanta tacliinta ee iskuulkada Ontario. [www.edu.gov.on.ca/eng/policyfunding/equity.html](http://www.edu.gov.on.ca/eng/policyfunding/equity.html)
- **Abaal-marinta Hormuudka ee Iskuullada Oggolaanshaha.** Abaal-marintu waxay garowsataa ilaa iyo 10 kooxo ee iskuullo oggolaansho iyo ammaan ah oo ah iskuulo qabtey howl ka baxsan oo hal abuur leh iyaga oo abuurey bay'ad iskuul oo oggolaansho leh ammaanna ah. [www.edu.gov.on.ca/eng/safeschools/award.html](http://www.edu.gov.on.ca/eng/safeschools/award.html)
- **Qatka Caawinaada Carruurta.** Tani waa adeeg latalin oo asturan lana heli karo 24/7. Booqo [www.kidshelpphone.ca](http://www.kidshelpphone.ca) ama wac **1-800-668-6868**.

## Macluumaad dheeraad:

- **U xoogsheegashada Ilooyinka loogu talogalay waalidiinta, waxaa soo saarey PREVNet (Horumarinta Xiriirada iyo Shabakadda Tirtirida Shaqaaqooyin)** (*Promoting Relationships and Eliminating Violence Network*)  
[www.prevnet.ca/BullyingResources/ResourcesForParents/tabid/390/Default.aspx](http://www.prevnet.ca/BullyingResources/ResourcesForParents/tabid/390/Default.aspx)
- **Buug-yaraha (Parent Tool Kit) Daabacaadda Dhalin-yarta: Maxay tahay Waxa ay Waalidiintu Qaban Karaan Si ay Ubadkooda Uga Caawiyaan Inay Guuleystaan.** Buug-yarahan waa talo siin la isu soo ururiyay, talo-bixin iyo ilo loogu talogaley in waalidka ay ka taageeraan oo ay dhalin-yartooda iskuulka ku dhiiri-geliyaan. [www.ontariodirectors.ca/Parent\\_Engagement/Parent\\_Engagement.html](http://www.ontariodirectors.ca/Parent_Engagement/Parent_Engagement.html)
- **Safe@School.** Boggan internetka waxaad ka heleysaa ilooyin ku saabsan ka hortagga u xoogsheegashada iyo mid ahanashaha iyo sinnaanta tacliinta, oo ay ku jirto ilo tababaro oo loogu talogaley macalimiinta iyo xubnaha shaqaalaha iskuulka. [www.safeatschool.ca](http://www.safeatschool.ca)
- **Stepping Stones: Isha Hormarinta Dhalinyarta.** Waxaa soo saarey Wasaaradda Adeegaha Dhalinta yarta iyo Carruurta, tani waxay ku siineysaa fekrad guud oo ku saabsan marxaladdaha horumarinta dhalinyarta ay da'doodu u dhaxeeyso 12 ilaa iyo 25, iyo qaababka aan inaga u caddeyn karno oo aan baahidooda uga jawaab-celin karno. Waxaad ka heleysaa [www.ontario.ca/steppingstones](http://www.ontario.ca/steppingstones)

---

Wax badan ka baro waxyaabaha ku saabsan iskuullada oggolaanshaha iyo iskuullada ammaanka [www.ontario.ca/acceptingschools](http://www.ontario.ca/acceptingschools)

Buug yarahan iyo macluumaad badan oo waalidiinta loogu talogaley oo ay ku qoran yihiin luqaddo badan ugu hagaag [www.ontario.ca/EDUparents](http://www.ontario.ca/EDUparents)

Dalbo nuqdooyin la daabacey ee buug yarahan oo af Ingiriis iyo Faransiis ka dalbo ServiceOntario uga hagaag [www.ontario.ca/publications](http://www.ontario.ca/publications)